

Saameynta COVID-19 Caafimaadka Maskaxeed ee Soomaaliya

Safmareenka COVID-19 wuxuu saameyn taban ku yeeshay caafimaadka jirka iyo maskaxda ee dunida oo dhan, Soomaaliyana liiska dalalka uu saameyay kama marna. Fayruska saameyn caafimaad oo kaliya kuma yeelan dalka ku yaalla Geeska Afika, wuxuu sidoo kale saameyn muuqata oo weyn ku yeeshay caafimaadka maskaxda iyo faya-qabka bulshada.

Soomaaliya waxay horay ula daalaa-dhaceysay saameynta aan wanaagsaneyn ee laga dhaxlay xaaladaha adag ee uu dalku soo maray, kuwaas ugu horreeyaan colaadaha sokeeye, oo dhaxalkiisu noqdeen dhibaatooyin caafimaadka dhimirka ah oo ay bulshada la daristay, waxaana ka mid ah Jahawareerka Ka-dambeeya Dhaawaca Maskaxeed ee loo yaqaanno PTSD.

Sida ay sheegtay qiimeyn ay sameysay Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO), saddexdii qofba midkood ayaa la kulmay saameyn caafimaadka dhimirka ah oo ay sababeen colaadaha iyo xaaladaha aadka u adag ee ay bulshadu wajahday.

Caafimaadka Dhimirka wali waxaa Soomaaliya looga arkaa ceeb, iyadoo bulshada badankeed aysan fahansaneyn miisaanka muhiimaddiisa. Dadka jahawareerka maskaxeed wajahaya ayaa laga takooraa bulshada, taas oo keenta daryeel la'aan ay dadkaasi kala kulmaan xitaa qoysaskooda iyo dadka ugu dhow. Dadka dhibaataada wajahaya, dadka dhibaatooyinka qoys ay heystaan, niyad-jabka iyo jahawareerka maskaxeed waxaa lagu tilmaamaa 'waalli'.

Covid-19 waa halis kale oo dhaawac xoog leh gaarsiin karta badqabka iyo caafimaadka dhimirka ee bulshada, haddii aan dedaallo wada-jira oo degdeg ah lagu wajihin xaaladda.

Sida qeyb ka ah dedaallada lagu doonayo in lagu wajaho saameynta taban ee Fayruska Karoona, Daryeelsan, oo ah hay'ad aan dowlad u shaqeynin oo

bini'aadannimo oo ka shaqeysa Maan-talinta iyo caafimaadka maskaxeed ee bulshada, ayaa dhawaanahay wadday ololo wacyigelin ah oo la xiriira faya-qabka bulshada, caafimaadka dhimirka iyo sida loola tacaalo walaaca ka dhasha COVID-19.

Intii ay ololahan wadday, Daryeelsan waxay ogaatay saameynta cudurka ee maskaxda oo ay ku jiraan cabsi, is-diidsiinIn jiritaankiisa iyo ceebsasho la xiriirta cudurka, taas oo dhalineysa xasilooni darro bulsho iyo saameyn baahsan oo uu ku yeesho caafimaadka dhimirka.

Dad badan ayaa karantiilka u arka ceeb, iyadoo is-godoominta iyo in cudurka qofka lagu arko ay abuureyso dareen cambaareyn. Wariyeyaasha ayaa warinaya jiritaanka qaar ka tirsan bulshada oo sheeganaya astaamo la mid ah kuwa Covid-19, iyagoo iska indha tiraya astaamaha, yareysanaya halista cudurka, kuna tilmaamaya hargab caadi ah, iyadoo aanay jirin wax tijaabo caafimaad ah.

Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya ayaa wadda dedaallo isdaba-joog ah oo ay kula tacaaleyso faafitaanka cudurka, olole wacyigelin iyo bixinta adeegyo caafimaad oo la siinayo bukaannada uu soo rito cudurka. Taasi oo kaliya kuma filna dhibaataada. Dedaallo dheeri ah ayaa loo baahan yahay in lagu bixiyo ololaha caafimaadka dhimirka, taageero maskaxeed oo bulshada la siiyo iyo yareynta saameynta caafimaadka dhimirka uu ku yeelanayo COVID-19.

-----Dhammaad-----